Casharka 23

1. Muxuu ahaa magaca wiilka Ilaah siiyey Ibraahim iyo Saarah?
-Isxaaq.

2. Miyaa Ibraahim garanayaa in Ilaah qorsheeyey inuu Badbaadiyaha ka soo daahiriyo farcanka Isxaaq?
-Haa.

3. Sidee baa ilaah u amrayaa in Ibraahim wax u bixiyo Isxaaq?
-Waayo Ilaah wuxuu nolol siiyey Ibraahim.
-Waayo Ilaah wuxuu nolol siiyey Isxaaq.
-Waayo Ilaah waa Sayidka dadka ood han.

4. Ilaah wuxuu ka ballan qaaday Ibraahim in Isxaaq noqon doono Aabbaha quruun weyn, oo badbaadiyuhuna noqon doono faraciisa?
-Miyaa haddaba Ilaah beddelay fikirkiisa.
-Maya.

5. Miyaa Ibraahim ay la noqotay in Ibraahim beddelay fikirkiisa ama maankiisa?
-Maya.
-Ibraahim wuxuu rumaystay Ilaah iyo Ballammadiisa.

6. Muxuu Ibraahim rumaystay inuu Ilaah u samayn doono haddii uu Isxaaq qurbaan ahaan u bixiyo?
-Ibraahim wuxuu rumaysnaa haddii uu qurbaan ahaan u bixiyo Isxaaq, in Ilaah Isxaaq ka kicin doono dhimashada.

7. Miyaa Ibraahim awooday inuu badbaadiyo Isxaaq?
-Maya.



8. Maxaa Ibraahim u awoodi waayey inuu Isxaaq badbaadiyo?
-Waayo Ibraahim wuxuu sare u qaaday midAfter diisii si uu Isxaaq allabbari ahaan ugu bixiyo.

9. Miyaa Isxaaq awood u lahaa inuu is-badbaadiyo?
-Maya.

10. Muxuusan Isxaaq u awoodin inuu is-badbaadiyo?
-Waayo Ibraahim lugaha iyo gacmaha ayuu ka xiray.

11. Miyaa dad kale ay awood u leeyihiin inay ina badbaadiyaan?
-Maya.

12. Miyaannu awood u leennahay inaynu is-badbaadinno?
-Maya.

13. Waa lia lam leoua ee awppdda iej omii oma badbaadoup?
-Ilaah.

14. Yaa la hadlay Ibraahim oo badbaadiyey Isxaaq?
-Ilaah.

15. Maxaa loo keenay qurbaan ahaan si uu u galo beddelkii Isxaq?
-Ilaah.

16. Maxaa ilaah orgiga uu keynta madaxa ugu geliyey?
-Waayo Ilaah wuxuu aqbalayaa oo keliya qurbaan dhammaystiran oo gelaya booskii ama beddelkii Isxaaq.

17. Maxaa Ibraahim ugu bixiyey, buurtii, yehovah Yireh?
-Ibraahim wuxuu rumaystay isla sidii ilaah orogiga u keenay, in Ilaah maalin maalmaha ka mid ah uu keeni doono Badbaadiyaha

dadka oo dhan.

-Xaaskii Ibraahim way weynaatay oo dhimatay.

-Isxaaqna wuxuu u murugooday hooyadii, laakiin waxaa isagii qalbi-qaboojiyey markii aabbihiis Ibraahim uu naag u doonay.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 24:67; 25:20

67-Isxaaqna wuxuu iyadii soo geliyey teendhadii hooyadiis Saarah, Rebeqahna wuu guursaday, oo naagtiisii bay noqotay. Wuuna jeclaaday iyada, oo Isxaaq waxaa laga qalbi qabowjiyey geeridii hooyadiis.

20-Isxaaqna afartan sannadood buu jiray markuu guursaday Rebeqan ina Betuu'el kii dalkiisu ahaa Suuriya ee reer Fadan Araam, iyadoo ahayd Laabaan kii dalkiisu Suuriya ahaa walaashiis.

-Muxuu ahaa magacii Isxaaq xaaskiisa?
-Rebeqah.
-Rebeqah waxa ku dhalatay dhulkii Ibraahim ku noolaa ka hor intaanu Ilaah ku soo hoggaaminin dhulkii kancaan.

-Wakhti ka dib, Ibraahim xitaa wuu dhintay.

-Waayo Isxaaq xaaskiisa Rebeeqah, waxay ahayd ma dhalays, oo ubadna way dhali kari weysay.

-Laakiin Isxaaq wuu tukaday, oo Ilahna salaaddiisii buu ka jawaabay.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 25:21-23



21-Isxaaqna naagtiisuu Rabbiga u baryay, maxaa yeelay, madhalays bay ahayd, Rabbiguna waa ka aqbalay, markaasay naagtiisii Rebeqah uuraysatay.

22-Carruurtiina uurkeeday isku dhex riixriixeen; markaasay tidhi, haday saas tahay, maxaan sidan u ahay? Kolkaasay u tagtay inay Rabbiga wax weydiiso.

23-Rabbiguna wuxuu wuxuu ku yidhi iyada, Laba quruumood baa maxalkaaga ku jirta. Oo laba dad oo kala duwan ayaa uurkaaga ka soo bixi doona. Oo labada dad midkood baa ka xoog badnaan doona dalka kale. Kan weynuna wuxuu u adeegi doonaa ka yar.

-Ka hore Rebeqah carruurteeda intayan dhalay, ayey wax ilmha ku saabsan Ilaah weyddiisay.

-Sidee baa ilaah ugu jawaabay?

-Ilaah wuxuu ku yiri Rebeqah waxay dhali doontaa mataano, oo carruuta kan weyn ayaa wuxuu u adeegi doonaa kan yar.

-Intaanay carruurtii rebeqah dhalan ka hor, Ilaah wuu garanayey iyaga.

-Sidee baa Ilaah ku ogaan karaa wax waliba ee ku saabsan carruurtii Rebeeqah intaanay dhalan ka hor?

-Ilaah wuxuu garanayaa wax waliba ee khuseeya dadka oo dhan?
-Ilaah wuxuu kaloo garanayaa wax waliba ee khuseeya dadka oo dhan.

-Ka hor inta aynaan dhalan, Ilaah wuxuu garanayaa wax waliba ee

inagu saabsan innaga wakhtigii la soo dhaafay.

-Ilaah wuxuu garanayaa wax waliba ee khuseeya dadka oo dhan.
-Ma jiraan wax ka qarsoon Ilaah maanta.

-Ilaah wuxuu garanayaa wax waliba ee inagu dhaca innaga mustaqbalka.

-Wakhti kaddib, Rebeqah waxay dhashay laba wiil.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 25:24-26

24-Oo markii wakhtigii ay umuli lahayd dhammaaday, bal eeg, waxaa maxalkeedii ku jiray mataano. Oo kii hore wuu soo baxay isagoo cas, korkiisa oo dhammuna wuxuu u ekaa dhar dhogor laga sameeyey, oo magaciisiina waxay u baxsheen Ceesow.
25-Oo kii hore wuu soo baxay isagoo cas, korkiisa oo dhammuna wuxuu u ekaa dhar dhogor laga sameeyey, magaciisiina waxay u baxsheen Ceesaw.
26-Dabadeedna waxaa soo baxay walaalkiis, gacantiisana waxay ku dhegganayd cedhibta Ceesaw; magiciiisiina waxaa loo bixiyey Yacquub; Isxaaqna lixdan sannadood buu jiray markay iyaga dhashay.

-Maxay ahaayeen magacyadii labadii wiil ee mataanaha ahaa ee ay Rebeeqah dhashay?

-Ceesaw iyo Yacquub.
-Ceesaw wuxuu ahaa curadka.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 25:27a



27-Wiilashiina way koreen; oo Ceesaw wuxuu ahaa nin ugaadhsiga aad u yaqaan, wuxuuna ahaa nin duurgal ah.

-Ceesow wuxuu ahaa ugaarsade wanaagsan, oo wakhtiga badankiisa ugaarsi buu ku maqnaa.

-laakiin Ceesow mid Ilaah rumaysan maahayn.
-Yacquub wuxuu ahaa wiilkii labad ee qoyska.

Bal aynu akhrinno Bilwogii 25:27b

27-Yacquubna wuxuu ahaa nin aamusan oo teendhoyin degi jiray.

-Yacquub wuxuu ahaa nin dhaqaalaysta ido iyo lo', oo wuxuu ahaa nin isaga dhex jira teendhadiisa.

-Yacquub wuxuu rumaystay Ilaah.
-Maalin, baa haddaba wax dhex mareen Ceesow iyo Yacquub.

Bal aynu akhrinno Bilwogii 25:29-34

29-Yacquub wuxuu karsaday fuud; markaasaa wxaa duurka ka yimid Ceesaw, wuuna daalanaa.
30-Markaasaa Ceesaw wuxuu Yacquub ku yidhi, Waan ku baryayaaye, i sii aan cunee fuudkaas cas, waayo, waan daalanahay, Sidaas daraaddeed magiciisii waxaa loo bixiyey Edom.
31-Yacquubna wuxuu yidhi, Maanta iga iibi curadnimadaada.
32-Markaasaa Ceesaw yidhi, Bal eeg, Geeri baan ku dhowahay; haddaba curadnimadu maxay ii taraysaa?

33-Markaasaa Yacquub ku yidhi, Maanta ii dhaaro. Kolkaasuu u dhaaartay, curadnimadiisiina wuxuu ka iibiyey Yacquub.

34-Yacquubna wuxuu Ceesaw siiyey kibis iyo fuud digir laga sameeyey, wuuna cunay oo cabbay, markaasuu intuu kacay, iska tegey. Sidaasuu Ceesaw u quudhsaday curadnimadiisii.

-Maalin maalmaha ka mid ah ayaa Ceesaw ka soo noqday Ugaarsi, oo aad buu u gaajaysnaa.

-Ceesow wuxuu arkay Yacquub oo karsanaya marag wanaagsan, wuxuuna ku amray in yacquub isaga maraqa wax ka siiyo.

-Maaddaama Ceesow gaajaysnaa, wuxuu curadnimadiisii Yacquub uga iibiyey xoogaa marag ah.

-Maxaa Ceesaw u iibiyey curadnimadiisii?
-Waayo Ceesaw ma qiimayn jirin curadnimada.

-Muxuu Ceesaw qiimay jiray?
-Ceesaw wuxuu qiimayn jiray oo keliya calooshiisa.
-Ceesow wuxuu kaloo qiimayn jiray jidhkiisa.

-Sidee bay u kala duwanaayeen Ceesow iyo Yacquub?

-Ceesow lama ahayn inuu dembi ku dhashay.
-Yacquubse wuxuu garanayey inuu dembiile yahay.

-Ceesow lama ahayn inuu ilaah ku dembaabay.
-Yacquubse wuxuu garanayey inuu ilaah ku xad-gudbay.

-Ceesow kuma fakarin in dembigu keeno dhimashada daa'imka ah.



-Yacquubse wuxuu garanayey in dembigu keeno dhimashada daa'imka ah.

-Ceesow ma uusan doonayn inuu ilaah raaco.
-Yacquubse wuxuu doonayey inuu Ilaah raaco.

-Ceesow ma uusan doonayn in Badbaadiyaha loo soo diro si isaga loo badbaadiyo.

-Yacquub wuxuu doonayey in Ilaah soo diro badbaadiyaha si isaga loo badbaadiyo.

-Maaddaama Ceesow ahaa curadka, ayaa waxaa uu lahaa isagu curadnimada.

-Curadka, ayuu noqon lahaa kan la soo marinayo Ciise Masiix, oo wuxuu ahaan lahaa wiilkii Ceesow.

-Laakiin Ceesow ma uusan qiimayn jirin curadnimada.

-Ceesow ma uusan doonayn in Ilaah soo marsiiyo faraciisa, Badbaadiyah.

-Ceesow dantiisu waxay ahayd maraqa guduudan.
-Ceesow wuxuu doonayey inuu aado halka calooshiisu ay ku hoggaamiso.

-Miyeynu haddaba innagu raacnaa halka ay calooshayadu inagu hoggaamiso?

-Mise waxaynu raacnaa waxa jidhkeennu inoo sheego inaan raacno?

-Mise waxaynu raacnaa waxa Ilaah inoo sheego innaga/

-Haddii aynu raacno halka calooshayadu inagu hoggaamiso, markaa dhimasho ayey inoohorseedaysaa.

-Haddiise aynu raacno Ilaah, wuxuu inagu hoggaaminayaa nolosha.

-Maaddaama Ceesow aanu Ilaah dooran, Ilaah wuxuu doortay Yacquub.

-Maaddaama Ceesow aanu Ilaah rumaysnayn, Ilaah wuxuu badbaadiyaha soo marsiinayaa faraca Yacquub ka iman doona.

-Maaddaama Ceesow aanu Ilaah rumaysnayn, Ilaah wuxuu siiyey Yacquub curadnimada.

-Markii Ilaah Yacquub siiyey curadnimada, Ceesow aad buu u carooday.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 27:41

41-Ceesawna wuxuu Ycquub u nebcaaday ducadii aabbihiis ugu duceeyey aawadeed. Ceesawna wuxuu isku yidhi, maalmihii aabbahay loo barooran lahaa waa dhow yihiin; dabadeedna waan dili doonaa walaalkay Yacquub.

-Ceesaw wuxuu aad ugu carooday Yacquub, oo wuxuu qorshaystay inuu Yacquub dilo.

-Balse Yacquub hooyadiis Rebeqah ayaa waxay maqashay Ceesaw oo ku taamaya inuu dilo Yacquub.



-Markaasaa Rebeqah u yeertay Yacquub, waxaanay isagii u dirtay dhulkii ay ku dhalatay.

Bal aynu akhrinno Bilwogii 27:42-44

42-Rebeqahna waxaa loo sheegay hadalkii wiilkeedii weynaa oo ahaa Ceesaw, markaasay intay u cid dirtay u dheedhay wiilkeedii yaraa oo ahaa Yacquub, oo waxay ku tidhi isagii, Bal eeg, walaalkaa Ceesaw wuxuu isku qalbi qabowjiyaa talojirka uu ku talo jiro inuu ku dilo.
43-Haddaba sidaas daraaddeed wiilkaygiiyow, codkayga addeec. Kac oo u carar walaalkay Laabaan xagga Haaraan.
44-Oo dhawr maalmood isaga la joog, ilaa walaakaa ciilku ka ba'ayo. Iyo ilaa walaalkaa cadhaduu kuu qabo ka ba'ayso.

-Yacquub wuxuu ka tegay Aabbihii iyo hooyadiis, wuxuuna u sodcaalay dhulkii Haaraan.

-Haaraan waxa ahayd dhulkii Yacquub hooyadiis ay ku dhaltay.

-Haaraan waxay ahayd dhulkii Yacquub awowgii Ibraahim ku dhashay ka hor intaanu soo aadin dhulkii Kancaan oo Ilaah ku soo hoggaamiyey.

-Waayo Haaraan aad bay u fogayd, sababtaas aawadeed Yacquub waxay ahayd inuu sodcaalo ilaa iyo maalmo fara badan.

-Habeen habeennada ka mid ah ayaa Yacquub seexday, Ilaahna riyo buu u soo diray Yacquub.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 28:10-13a

10-Yacquubna waa ka tegey Bi'ir Shebac, oo wuxuu u kacay xagga Haaraan.

11-Oo meel buu gaadhay oo halkaasuu habeenkii ood han joogay, maxaa yeelay, qorraxdu way dhacday, makraasuu qaaday mid ka mid ah dhagxantii meeshaas, oo barkaday, halkaasuuna jiifsaday si uu u seexdo.

12-Wuuna riyooday, oo riyadiisii wuxuu ku arkay sallaan dhulka qotoma oo caaraddiisiina samada gaadhay,

13-Oo bal eeg Rabbigaa is-dul taagay.

-Muxuu Yacquub ku arkay riyadiisii?
-Yacquub wuxuu arkay sallaan samada sare gaaray madaxiisa.

-Halkee baa sallaanku qotonsanaa?
-Sallaanka wuxuu qotonsanaa dhiniciisa kale dhulka.

-Halkee baa caaradda sallaanku gaarsiisnayd?
-Caradda ama xagga sare ee sallaanku wuxuu gaaray samada.

-Maxay loola jeedaa in sallaanku qotonsanaa dhulka, oo caaraddiisii kalena ay gaarsiisnayd samada sare?

-Sallaanka ama jaranjaradu waxay isku xiraysay samada iyo dhulka.

-Halka sare ee sallaanka yaa taagnaa?
-Ilaah.
-Yaa allaanka hore iyo dib ugu soconayey?
-Malaa'igaha.

-Maxay ka macne tahay in malaa'iguhu ay hore iyo dib ugu socdaan sallaanka?



-Waxay ka macne tahay in Ilaah doonayey inuu noqdo Ilaahii Yacquub.

-Maxaa Ilaah riyadan u tusay Yacquub?
-Ilaah wuxuu Yacquub barayey wax ku saabsan BAdbaadiyaha iman doonay.

-Maxaa Ilaah ka barayaa Yacquub Badbaadiyaha?

-Maaddaama sallaanku isku xirayey samada iyo dhulka, Ilaah wuxuu soo dirayaa Badbaadiyaha kaasoo isku keenaya dadka dunida jooga iyo Ilaah oo isagu jooga samada.

-Bilowgii, Ilaah wuxuu la socon jiray Aadan iyo Xaawo.

-Laakiin Aadan iyo Xaawo waxay addeeci waayeen Ilaah, waxaanay ka dhaqaaqeen Ilaah.

-Haddaba ma jirto si Aadan iyo Xaawo ay Ilaah ula socon karaan mar labaad.

-Laakiin Ilaah wuxuu ballan qaaday inuu soo dirayo BAdbaadiye, isku keenaya dadka dunida jooga, iyo Ilaaha amada jooga mar kale.

-Badbaadiyaha wuxuu u iman doonaa inuu badbaadiyo dadka, si Ilaah iyo dadkuba ay mar kale iskula socdaan.

-Bal aan sharraxaad idin siiyo:

-Nin la yiraahdo Xusen iyo Cali ayaa saaxiibbo wanaagsan ahaa.

-Cadowgooduna aad buu u nebcaa labadoodaba.
-Cadowgu wuxuu ka xumaa saaxiibtinnimadooda.

-Maalin maalmaha ka mid ah, ayaa ninkii cadowga ahaa wuxuu ku fakaray qaab uu ku burburiyo saxiibtinnimada Xuseen iyo Cali

-Cadowgii wuxuu u yimid Xuseen, oo wuxuu ku yiri Cali wuxuu doonayaa inuu ku dhaawoco.

-Xuseen wuxuu rumaystay beentii cadowga, oo isaga iyo Cali way kala tageen ama kala dhaqaaqeen.

-Cali, haddaba aad buu u jeclaa Xuseen, wuxuuna baadi-goobayey jid ama dariiq uu ku soo celiyo saaxiibtinnimadiisa.

-Cali wuxuu soo diray wiilkiisa sid uu Xuseen ula soo hadlo, oo ugu sheego in cadowgu khiyaameeyey.

-Waayo wiilka dartee ayaa Cali iyo Xuseen mar kale ku saaxiibeen.

-Shayddaanku wuxuu khiyaameeyey Aadan iyo Xaawo, markaasay ka dhaqaaqeen Ilaah.

-Welibana Ilaah wuxuu ballan qaaday inuu soo diro BAdbaadiyaha kaasoo Ilaah iyo dadka mar kale isku keeni doona.

-Maaddaama sallaanka uu yahay waxa sammada gaaray, ayaa Badbaadiyaha oo keliya halkaas gaari karaa.

-Riyadan ayaa ilaah kula hadlay Yacquub.



-Waxaana Ilaah isagoo riyada kala hadlaya Yacquub leeyahay sidatan soo socota:

Bal aynu akhrinno bilowgii 28:13b-15

13-Oo yidhi, Waxaan ahay Rabbiga ah Ilaaha awowgaa Ibraahim, iyo Ilaaha Isxaaq. Dhulka aad ku jiifto, waxaan siin doonaa adiga iyo farcankaaga.

14-Farcankaaguna wuxuu noqon doonaa sida ciidda dhulka, oo waxaad ku firdhi doontaa tan iyo galbeed, iyo bari, iyo tan iyo woqooyi, iyo koonfur; oo adiga iyo farcankaagay qabiilooyinka dhulka oo dhammu ku barakoobi doonaan.

15-Oo bal eg, waan kula jiraa, meel alla meeshii aad tagtidna waan kuugu dhowri doonaa, dalkanna mar kalaan kugu soo celin doonaa; waayo, anigu kaa tegi maayo ilaa aan sameeyo wixii aan kugula hadlay.

-Xilliyadii hore Ilaah wuxuu dadka kula hadli jiray riyo.

-Maanta, sidee buu Ilah aalaaba ula hadlaa dadka?
-Maanta, Ilaah wuxuu sida badan dadka kala hadlaa Kitaabkiisa, Baybalka.

-Maxaa Ilaah ula hadlay Yacquub?
-Ilaah wuxuu siinayey Yacquub ballan.

-Ballankii Ilaah siiyey Ibraahim iyo Isxaaq, ayuu haatanna Ilaah siiyey Yacquub.

-Maxaa Ilaah ka ballan qaaday Yacquub?

-Ilaah wuxuu ballan qaaday in Yacquub helayo farac badan.

-Ilaah wuxuu ballan qaaday inuu Yacquub barakadayn doono.

-Ilaah wuxuu ballan qaaday inuu dadka oo dhan ku barakadayn markii uu soo diro, Badbaadiyaha, oo isagu noqon ddonay mid ka soo farcamay Yacquub.

-Miyaa ilaah illoobay Ballankiisii ahaa inuu soo dirayo Badbaadiye?
-Maya.
-Ilaah ma Illoobi karo Ballankiisa ah inuu soo diro Bdbaadiye.

-Maxa Ilaah uusan u illoobi karin ballankiisa ah inuu soo dirayo Badbaadiye?

-Waayo Ilaah waxba ma illoobo.
-Waayo Ilaah isma beddelo.
-Waayo Ilaah mar waliba wuxuu dhowraa ballammadiisa.

-Haddaba subaxdii xigtay Yacquub horey buu u siiwatay sacdalkiisii.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 29:1

1-Yacquubna sodcaalkiisii buu iska sii socday, oo wuxuuna yimid dalkii reer Bari.

-Yacquub wuxuu horey u sii watay safarkiisii, ilaa uu soo gaaray ugu dambaystii Haaraan.

-Haaraan, Yacquub wuxuu ku noolaa sannado badan.
-Haaraan, Yacquub wuxuu lahaa laba gabdhood, oo wuxuu noqday Aabbaha 12 wiil.



-Ka dib markii Yacquub ku noolaa Haaraan sannado badan, ayaa ilaah mar kale la hadlay.
-Waxaa halkan ku qoran wixii Ilaah ku yiri Yacquub intii uu joogay Haaraan.

Bal aynu akhrinno Bilwogii 31:13

13-Waxaan ahay Ilaaha Beytel, meeshii aad tiirka ku subgtay, oo aad nidarka iigu nidartay. Haddaba kac, oo dalkan ka bax, oo ku noqo dalkii aad ku dhalatay.

-Kaddib markii Yacquub ku noolaa dhulkii Haaraan sannado badan, maxaa Ilaah u sheegay Yacquub?

-Ilaah wuxuu Yacquub ku yiri ka tag Haaraan, oo waxaad ku noqotaa dhulkii Kancaan.

-Markii Yacquub ku noqday dhulkii Kancaan, Ilaah wuxuu siiyey Yacquub magac cusub.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 32:28

-Markaasuu ku yidhi, Magacaaga hadda ka dib lama odhan doono Yacquub, waase Israa'iil; waayo, Ilaah iyo dadba waad la dagaallantay, waanad ka adkaatay.

-Muxuu ahaa magacii cusbaa e Ilaah siiyey Yacquub?
-Israa'iil.
-Magaa Israa'iil wuxuu ka dhigan yahay loollan.

-Waxaannu wax badan ka baran doonnaa Yacquub markiia ynu gaarno casharrada kuwan inoo xiga.